GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND
SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES







# Warbixinta

## Wax-qabadka Kal-fadhigii 2aad ee Golaha Wakiillada

*04 December 2021 illaa 15 February 2022*

*May 2021*

# ARRAAR

## Mudanayaal.

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhigan 3aad ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore oo Goluhu Shaqooyin badan qabtay sida Ansixinta Xeer, Go'aano ama qaraaro Goluhu soo saaray iyo sidoo kale shaqooyinkii Gudiyada Golaha.

Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena yo hawlaha faraha badan ee inoo qorshaysan kal-fadhigan darteed waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadkii kal-fadhigii 2aad ee Golaha iyo wixii kale ee hawlo ah ama dhacdooyin ahaa ee mudaddii ka dambeysay ee fasaxa kal-fadhigaas.

# TUSMADA WARBIXINTA


HORDHAC....4

WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 2AAD ....5

*Warbixinadii Golewaynaha laga hor akhirayay*....5

*Mashaariicdii Sharci Goluhu ka doodday*....5

*Xeerarka Goluhu Ansixiyay*....6

*Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay*....6

*Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka.*....7

*Xeerarka Golaha horyaal.*....9

WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA WAKIILADA .... 10

*Gudidda Joogtada iyo Anshaxa*....10

*Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta*....12

*Gudidda Daba-galka iyo Illaalinta Hantida Qaranka* ....14

*Guddida Arimaha Bulshad*....15

*Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka* ....17

*Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada*....19

*Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada* ....21

*Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga*....22

*Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.* ....24

*Gudidda Arrimaha Nabadgalyada, Difaaca iyo Amniga* ....25

*Gudiyadii Gaarka ahaa Kal-fadhigii 2aad la saaray*....28

QORSHE ISTARAATIJIYADEEDKA 5TA SANNO EE GOLAHA WAKIILLADA.... 29

AQOON-KORODHSIYADII LOO QABTAY GUDIYADA GOLAHA .... 29

DOORKII GOLAHA WAKIILLADA EE ABAARIHII DALKA.... 34

MAALINTA GOLAHA IYO DADWEYNAHA OO GOLUHU ARDAYDA JAAMACADA LA KULMAY. .... 35

SAFARADII DALKA DIBADDIISA.... 37

WUFUUDIHII IYO MADAXDII KALE EE SHIR-GUDOONKU LA KULAMAY.... 39

*LIISKA TIXRAACYADA.* ....41

B) Ajandaha Kal-fadhigii 2aad ....41

## HORDHAC.

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5aad (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1aad ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39aad, Qodobka 53aad, Qodobka 54aad iyo Qodobka 55aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu yeeshay kal-fadhigii 2aad mudaddii u dhexaysay 04 December 2021 illaa 15 February 2022, kal-fadhigaas oo ahaa kal-fadhigii horeeyay ee Golahan 5aad ee Wakiillada Somaliland. Hadaba warbixintan waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee Kal-fadhigaas 2aad iyo mudaddii fasaxa ee ka dambeysay wixii uu qabtay.

## WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 2AAD

***Wax-qabadkA Kal-fadhigii 2aad ee Golaha Wakiillada***

1. **Fadhiyadii Golaweynaha ee Kal-fadhigii 2aad** — **25Fadhi**
2. Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn — 37 Kulan
3. Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada — 62 Fadhi/kulan

### Warbixinadii Golewaynaha laga hor akhirayay

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| 11 December 2021 | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 1aad | Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha |
| 11 December 2021 | Warbixinta Gudidda Joogta iyo Anshaxa | Md. Axmed Cabdi Casoowe Gud. Ku-xigeenka Gud. Joogtada |
| 12 December 2021 | Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha | Md. Axmed Maxamed Hurre Gud. Ku-xigeenka Gudidda Gudidda Dhaqaalaha |
| 12 December 2021 | Warbixinta Gudidda Deegaanka | Md. Mubaarik Muuse Ismaciil Gud. Gudidda Deegaanka |
| 12 December 2021 | Warbixinta Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada | Md. Yaxye Arraarse Gud. Gudidda Garsoorka iyo Cadaaladda |
| 27 December 2021 | Warbixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022. | Dr. Sacad Cali Shire Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada |
| 02 January 2022 | Warbixinta Kormeerada Gobolada Dalka ee Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka. | Md. Mustafe Axmed C/laahi Gud. Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka |
| 08 January 2022 | Warbixinta Xisaab XIdhka Miisaaniyadii 2020kii ee Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka. | Md. Axmed Cabdi Ibraahim Xubin Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka |
| 15 January 2022 | Warbixinta Gudidda Dhaqaaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Odoroska Miisaaniayda Qaranka sanadka 2022ka | Md. C/rashiid Gud. Gudidda Dhaqaalaha |
| 16 January 2022 | Waxbixinta Guddida Arrimaha Gudaha ee Xeerka ka-hortaga iyo xakamaynta ka-ganacsiga iyo Tahriibinta Dadka. | Md. Axmed Nuur Guruuje Gud. Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 29 January 2022 | Warbixinta Guddida Cadaalada ee Xeerka Xaquuqda Caruurta. | Md. Yaxye C. Amiin Gud. Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka |
| 05 February 2022 | Warbixinta Guddida Dhaqaalaha ee Xeerka Caymiska shirkadaha. | Md. C/rashiid Gudoomiyaha Gudidda Dhaqaaalaha |

### Mashaariicdii Sharci Goluhu ka dooday

| N | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | 22 iyo 30/01/ 2022 |

| | | |
|---|---|---|
| 2. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha | 29 illaa 30/02/2022 |

## Mashaariicdii Sharci ee Goluhu Ansixiyay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xisaab Xidhka Miisaaniyadii 2020kii | 11/01/2022 | Madaxweynaha |
| 2. | Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka. | 15/01/2022 | Madaxweynaha |
| 3. | Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka | 18/01/2022 | Madaxweynaha |
| 4. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | 24/01/2022 | Golaha Guurtida |
| 5. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha | 01/02/2022 | Golaha Guurtida |
| 6. | Xeerka Shaqaalaha Dawlada | 16/02/2022 | Madaxweynaha |

## Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay

| No | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Axmed Adan Jaamac | Wasiirka Wasaarada Horumarinta Reermiyiga | 09/01/2022 |
| 2. | Cali Xasan Maxamed | Wasiirka Horumarinta Biyaha | 09/01/2022 |
| 3. | Cabdilahi Cabdiraman Aare | Wasiirka Horumarinta Maal-gashiga | 09/01/2022 |
| 4. | Cabdirisaq Xuseen Cali | Wasiirka Diinta iyo Awqaafta | 09/01/2022 |
| 5. | Cabdilahi Faarax Cabdi | Wasiirka Macdanta iyo Tamarta | 09/01/2022 |
| 6. | Rooda Jaamac Cilmi | Wasiir ku xigeenka Maaliyadda | 09/01/2022 |
| 7. | Cabdinaasir Cumar Jaamac | Wasiir ku Xigeenka Arrimaha Dibedda | 09/01/2022 |
| 8. | Cabdilaahi Xuseen Cilmi | Wasiir ku Xigeenka Arrimaha Guddaha | 09/01/2022 |
| 9. | Siciid Axmed Jibriil | Wasiir ku xigeenka Horumarinta Biyaha | 09/01/2022 |
| 10. | Cabdixakim Siciid Muuse | Wasiir ku xigeenka Waxbarshada | 09/01/2022 |
| 11. | Maxamed Cabdilahi Guuleed | Guddoomiyaha Guddida Qandaraasyada | 09/01/2022 |
| 12. | Khaalid Jaamac Axmed | Guddoomiyaha hay'ada Shaqaalaha Dawlada | 09/01/2022 |
| 13. | Saleban Cawad Cali Bukhaari | Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska | 09/01/2022 |
| 14. | Cali Cabdilahi Daahir | Guddoomiyaha Banka Dhexe | 09/01/2022 |
| 15. | Aamina Xuseen Maxamuud | Guddoomiye ku xigeenka H. Shaqalaha | 09/01/2022 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 16. | Axmed Xasan Ibraahim | Xubin Komishanka Maamul Wanaaga ah | 10/01/2022 |
| 17. | Cabdiraxman Cali Cabdi | Wasiir Ku-xigeenka W. Warfaafinta | 10/01/2022 |
| 18. | Dr. Ciise Cabdiraxman Kayd | Wasiirka W. Arr. Dibada | 11/01/2022 |
| 19. | Cabdirisaaq Ibraahim Ataash | Wasiirka W. H. Jidadka iyo Gaadiidka | 15/01/2022 |
| 20. | Maxamed Xaaji Cismaan | Wasiirka Wasaarada Beeraha | 18/01/2022 |
| 21. | C/caziiz Maxamed Xaashi (Cago-weyne) | G/kuxigeenka Gudida Qandaraasyada Qaranka | 24/01/2022 |

## Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka.

Sida Ku Cad Dastuurka Qodobkiisa 55aad Odoroska Miisaaniyada Qaranka dib u eegideeda, wax ka badalkeeda iyo ansixinteeda waxa awood buuxda uu dastuurka iyo xeerarka kale ee Maaliyadu u siiyeen Golaha Wakiillada, waxaana odoroska Miisaaniyadeedka sanadka soo diyaarisa Wasaarada Horumarinta Maaliyada, ka dibna waxa soo ansixiya Golaha Xukuumada oo iyagu Golaha Wakiillada u soo gudbiya, iyadoo marka Xukuumadu soo gudbiso ay ugu horeyn Wasaarada Horumainta Maaliyadu warbixin buuxda ka siiso Golaha, isla markaana Mudanayaasha Goluhu wuxuu su'aalo qabaan ka waydiiyaan Wasiirka iyo Masuuliyiinta Wasaarada Maaliyada.

Hadaba, Odoroska Miisaaniyad sannadeedka 2022ka waxa Golaha loo soo gudbiyay 27 December 2021, iyadoo isla Maalintaas Fadhi ka mid ah Kal-fadhigii 2aad uu Golaha Warbixin ka siiyay Wasiirka **Wasaarada H. Maaliyada Dr. Sacad Cali Shire**, isla Markaana mudanayaal tiro badani su'aalo ka waydiiyeen, Wasiirka iyo Saraakiisha kale ee Wasaaradiisuna uga jawaabeen Mudanayasha. Iyadoo intaas ka dib sida Xeer-hoosaadku dhigayo isla markaana Hab-raaca Miisaaniyada Golaha Wakiiladu uu yahay, waxa si toos ah Miisaaniyada loogu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga si ay u soo lafa-gurto, ka dibna, warbixin ugu soo siiso Golewaynaha.





*Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada iyo Saariiksha Wasaaradaas oo Golaha Warbixin ka siinaya Miisaaniyada Sanadka 2022*

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Goluhu waxay ka soo shaqaynaysay Miisaaniyada muddo laba toddobaad ah, ka dib markii ay kulamo kala duwan la soo yeelatay qaybaha kala duwan ee khusayso ama ay u aragtay inay wax ka waydiiso sida Wasaarada H. Maaliyada iyo hay'addo kale oo dawladeed iyo hay'addo gaar ahba, isla markaana la tashiyo badan iyo falanqayan balaadhan ku soo samaysay Miisaaniyada iyo qaybaha ay ka kooban tahay.

**15 January 2022** ayay Gudiddu Warbixn dheer oo aad u qiimo badan Golaha ku soo celisay, warbixintaas oo xambaarsanayd wax ka badal iyo kala wareejin madaxyo iyo madax-xigeeno Miisaaniyada ah.

Warbixintaas ka dib, wuxuu Golaha Wakiilladu isla fadhigaas gudo galaya inuu ka guto waajibaadka shaqo ee uga hadhsan Miisaaniyada, waxayna Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Goluhu isla qaateen in Miisaaniyada lagu ansixiyo wax ka badalka iyo kaabista ay Gudidda Dhaqaaluhu soo jeedisay. Intaas ka dib, isla fadhigaas wuxuu Goluhu Cod aqlabiyad ah ku Ansixiyay Odoroska Miisaanad Sannadeedka 2022ka oo wax ka badal aad u badan lagu sameeyay, waxayna ahayd wax ka badalkii iyo kaabistii ugu waynayd uguna badnayd ee abid Golaha Wakiilladu ku sameeyo Mashruuc Sharciyadii Miisaaniyad sannadeed ee Xukuumadu u soo gudbisay, taas oo Goluhu uu **5 Madax** oo Miisaaniyada ka mid ah uu ka jaray lacag isugaynteedu dhan tahay **59,209,082,447/= SL Shilling,** isla markaana lagu kala kordhiyay **15 Madax iyo madax-xigeen** oo kala duwan kuwaas oo uga baahi badnaa Madaxyada laga soo jaray. Ugu dambeyn Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka oo Goluhu Madaxweynaha u gudbiyay **15 January 2022,** wuxuu Madaxweynuhu dhaqangalin ku sameeyay **17 January 2022ka** oo ahayd laba cisho ka dib markii Golaha Wakiilladu Ansixiyay.

## Xeerarka Golaha horyaal.

Iyadoo Golaha Cusub Golihii hore kala wareegay dhowr xeer oo marxalado kala duwan maraya sida kuwo marxaladii qabyo-qoraalka maryaa, kuwa heerkii Gudiyada maraya iyo kuwo akhriskii 2aad iyo akhriskii 3aad maraya. Iyadoo Kal-fadhigii 2aad Goluhu dhowr xeerar uu ansixiyay. Isla markaana aanu la dhamaystirin Xeerarkii ku qorshaysnaa Ajandihii Kal-fadhiga 2aad.

Hadaba, Xeerarka Golaha horyaal Kal-fadhigan 3aad waxa ka mid ah 4 Xeer oo heerkii Gudiyada maraya iyo laba Xeer oo ka soo kala noqday Golaha Guurtida, xeerarkaas oo kala ah kuwa ku muujisan shaxdan hoose.

| No | Magaca Xeerka | Gudidda gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| **1.** | Xeerka Macdanta Qaranka | Gudiddda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah |
| **2.** | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| **3.** | Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Maamulka iyo Maaraynta Maaliyada | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| **4.** | Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Dakhliga Guud | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |

### B. Xeerarka Qabyada ah Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha | Guurtida ka soo noqday |
| 2. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | Guurtida ka soo noqday |
| 3. | Xeerka Shirkadaha Caymiska Qaranka | Gudi gaar ah loo saaray |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

# WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban.

## Gudidda Hawlaha Golaha (Business Committee)

Intii lagu jiray Kal-fadhigii 2aad ee Golaha Wakiillada 5aad ee Somaliland waxay Gudidda Hawlaha Golaha (Business Committee) ay yeelatay saddec kulan oo kala duwan, saddexdaas Kulan oo Gudiddu ka arrinsanaysay Qodobadan hoose: -

1. Diyaarinta Qabyo-qoraalka Ajandaha Kal-fadhiga 2aad iyo Qodobada uu ka koobmayo.
2. Dib u eegista iyo soo koobida Qodobadii Dooddii Xildhibaanada ee Xaalada Abaaraha dalka ka soo baxay ama doodda laga soo ururiyay.

## Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladdu waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro. Guddida Joogtadu iyo anshaxu iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah. Iyadoo ka duulaysa Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladda.

Muddadii lagu jiray fasaxa Kal-Fadhigii 2aad Waxa kulmay labada Guddi Joogto Ee labada Gole Guurtida Iyo Wakiillada, kulankaas oo u jeedaddiisu ahayd isbarasho, isxog-waraysi, wada tashi iyo sidii loo xoojin lahaa AMNIGA GOLAHA. Waxaana loo balamay kulamo danbe.



*SAWIRO. Kulamadii Gudidda Joogtada ay la yeelatay Masuuliyiinta Qaranka*

Dhinaca kale, muddadii fasaxa lagu jiray waxa soo booqday Golaha 2 iskuul. Booqashadaasi ardayda oo ahayd aqoon korodhsi, qaar ka mid ah xildhibaanada golaha iyo xoghayaha guud ee Golaha ayaa xarunta G. wakiilada ku soo dhaweeyay, iyaga oo ku wareejiyay dhismayaasha golaha isla markaasna sharaxaad ka siiyay qaybaha kala duwan ee goluhu ka kooban yahay, shaqada goluhu qabto, marxaladihii kala duwanaa ee goluhu soo maray, gudoomiyayaashii iyo tirada kala duwanaa ee mudanayaashu gole walba ka koobnaayeen tan iyo wakhtigii qaranimada Somaliland la la soo noqday ee gole wakiilo ah qarankani yeesho, taas oo Xoghayaha Guud Ee Golaha Wakiiladu si qoto dheer ugu sharaxay ardayda iyo maamulkii la socday.

Guddida Joogtada iyo Anshaxu iyagoo og muhiimadda Qaran ee ay u hayaan Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Madax-Banaan ee Dawlada, Waxa ay Mudanayaasha Guddida joogtaddu & iyo Anshaxu kulamo xog-waraysi la yeesheen warbixino kala duwana ka dhagaysteen masuuliyiinta Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka Qaar ka mida intii Fasaxa lagu jiray oo kala ah: -

1. Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga 12/03/2022
2. Guddida Kaalmaha Shidaalka 14/03/2022
3. Guddida Gurmadka Abaaraha (Madaxweyne Ku Xigeen) 17/03/2022
4. Gudoomiyaha Baanka Dhexe 27/03/2022
5. Guddida Qaran Ee Tacliinta Sare 30/03/2022
6. Guddida Heer Qaran Ee Gurmadka Suuqa Waaheeen 08/05/2022

**Kulamadii Guddida Ka Baaqdey Intii Kalfadhiga Fasaxiisa lagu jiray: -**

1. Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka Iyo Guriyeynta 28/03/2022
2. Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Iyo Sayniska 02/04/2022



*SAWIRO. Kulamadii Gudidda Joogtada ay la yeelatay Masuuliyiinta Qaranka*

## Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamarta, waxa u qabsoomay intii lagu jiray kal-fadhigii 2aad iyo mudaddii fasax ee ka dambeysay, waxyaabo kala duwan, waxaana ka mid ahaa kulamo ay la qaateen Masuuliyiin Dawladda ah iyo Safar shaqo oo ay ugu baxeen Gobollada Galbeedka.

- ***Kulankii Guddoomiyaha Hay'adda U. Aafooyinka iyo K. Raashinka Qaranka***

**03/02/2022** Guddida Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamartu waxay kulan is xog waraysi ah ugu yeedheen Hay'adda u diyaar garawga Aafooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka ee NADFOR.

Kulankanna waxa war bixin Guud ka jeediyay Guddoomiyaha Hay'dda u diyaar garawga iyo kaydka raashinka Qaranka, **Md. Faysal Cali sheikh.**

Waxaanu si faah-faahsan uga warbixiyay Abaarihii soomaray Waddanka iyo waxyaalaha u Qorshaysan ee lagaga bixi karo Abaaraha, waxa kale oo uu ka warbixiyay kaydka Raashinka ay hayaan iyo qaabka ay u bixiyaan.

- ***Kulankii Wasiirka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo horumarinta Kalluumaysiga***

**26/02/2022** Guddida Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamartu waxay kulan is xog-waraysi ah ugu yeedheen Wasiirka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha horumarinta Kalluumaysiga.

Kualankan waxa war-bixin guud ka bixiyay Wasiirka, kaas oo faah-faahiyay hawsha ballaadhan ee ay wasaaraddu Qaranka u hayso. Waxa kale oo wasiirku war bixin ka bixiyay Ololе Tallaal oo ay ka bilaabayaan dhammaan Gobollada Somaliland, si ay wax yeellada iyo xanuunada abaaruhu ay ku keeneen Xoolaha looga hortago. Waxa kale oo uu Wasiirku ka

war-bixiyay Xarun loogu talagalay Tarminta Calafka Xoolaha oo laga Dhisay Degmada Wajaale, taas oo loogu tala galay in xoolaha lagu Daweeyo laguna Quudiyo.

Haddaba Guddidu waxay safar shaqo ku soo mareen degmada Wajaale taas oo ay ku soo kormeereen war bixintii Wasiirka ee Xarunta Taranka Calafka Xoolaha ee Degmada Wajaale, taas oo aan gebi ahaanba shaqaynin iyadoo laba sanno ku jirtay Miisaaniyadda Qaranka.

- ***Safarkii ay guddidu ku tahay Gobollada Galbeed ee Somaliland***

Guddida Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamarta ayaa 06 ilaa 11 March 2022 Safar shaqo ugu kicitimay Gobollada Galbeed ee Somaliland sida Gabiley iyo Awdal, safarkaas oo daarrana xogogaal u noqoshada Xaaladaha Deegaan, Abaareed, Mashaariiceed iyo Shaqada ay Qaranka Wasaraadaha iyo Hay'adaha wadashaqaynta la leh Guddida. Safarkan ayaa wuxuu qaatay muddo Shan Cisho ah.



*Gudidda Deegaanka, Kh. Dabiiciga ah Wax Soo-saarka iyo Tamarta oo la kulmay Gudoomiyaha G. Gabiley*

## Gudidda Daba-galka iyo Illaalinta Hantida Qaranka

Muddadii lagu jiray kal-fadhigii 2aad ee Golaha Wakiilada 5aad waxay Guddidu Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Golaha Wakiiladu qabatay shaqooyinkan soo socda:-

***Masuuliyiintii ay kulamada la yeesheen.***

- **Taarikhdu markay ahayd 12/02/2022** waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku ay kulan la yeelatay Maareeyaha Wakaalada Biyaha Hargeisa, kulan oo ahaa xog-waraysi kuna saabsanaa shaqada Wakaalada Biyuhu u hayso Qaranka.

- **Taariikhdu markay ahayd 12/02/2022** waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku kulan xog-waraysi ah la yeelatay shirkad la yidhaa SAHAL Technology, shirkadaas oo maamusha nidaamka lagu ururioy dakhliyada dalka ee cashuuraha barriga iyo kastamada. Iyadda oo Guddidu wixii xog iyo warbixin ah ee Ku saaban shirkadan la wadaagi doonto Golaha weynaha.

- **Taarikhdu markay ahayd 16/02/2022** waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku ay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Koomiishanka maamul-wanaaga, kulan oo u jeedadiisu ahayd sidii doorka Koomiishan ee Maamul-wanaaga u noqon mid u gudta waajibaadkiisa sida xeerarku dhigayaan.

- **Taarikhdu markay ahayd 22/02/2022** Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Maareeyaha Kaydka Haamaha Shidaalka Berbera, iyaddoo u jeedada kulanku ahaa waxyaabaha Shidaal qaaliyeeyey iyo arrimo kale oo la xidhiidh hawlaha baaxada leh ee Kaydka Haamaha Shidaalka Berbera.

- **Taariikhdu markay ahayd 26/02/2022**, waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku ay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Maareeyaha Hay'adda Dekadaha Somaliland, kulan oo daarnaa ka warbixinta shaqada Hay'dda, hawlaha ka socda Dekedaa Berbera, free Zone iyo arrimaha guud ee maamulka SPA.

***Masuuliyiintii Qaran ee ay ka soot ala-bixiyeen Ansixintooda.***

- ✓ **23/1/2022,** waxay ka soo tala-bixiyeen Golahana u soo jeediyeen inuu Ansixiyo ka dib markii soo hubiyeen in xilkaas loo ansixin karo **Guddoomiye ku xigeenka Guddida Qandaraasyada Qaranka Mr. Cabdicasiis Cagaweyne.**




*Kulankii Gudidda Illaalinta Hantida Qaranka iyo Gudoomiye ku-xigeenka Qandaraasyada Qaranka*

- ✓ **06/01/2022,** Ka dib markii ay kulamo la yeesheen, isla markaana soo hubiyeen inuu hanan karo waxay Golewaynaha uga soo talo-bixiyeen inuu ansixiyo labada Masuul ee kala ah **Guddoomiyaha Guddida Qandaraasyada Qaranka Md. Maxamed Cabdilahi Guuleed** iyo **Md. Axmed Xasan Ibraahim** oo ah Xubin ka mid ah Koomiishanka Maamul-wanaaga.

***Xeerarkii iyo Warbixinadii kale ee Gudiddu Golewaynaha la wadaagtay.***

- **02 January 2022** waxay Golaha ka jeedisay Warbixin ay ka diyaarisay Kormeero ay Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Gobolada Dalka dalka ku tagtay.
- **08 January 2022** waxay Golaha ka jeedisay Warbixin ay Gudiddu ka soo diyaarisay Xisaab Xidhka Miisaaniyada sanadka 2020kii oo Gudiddu gacanta ku haysay.

## Guddida Arimaha Bulshad

**21-03-2022** Guddida Arrimaha Bulshadu Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Macalimiin ka Cabanayey Kuuliyadda Tababarka Macalimiinta iyo Wasaarada Waxbarshada, Ardaydan oo Tiradoodu dhamayd 229 Macalim, macalimiintan ayaa Cabashadooda la waadagay Guddida Arrimaha Bulshada oo dhageystay Dacwada ay qabeen macalimiintasi intaas kadib Guddida ayaa balan qaaday in ay kula xisaabtimi doonaan Hay'addaha ay iyo Masuuliyiinta ay Khusayso.



*Kulankii Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Macalimiin Cabasho u so gudbiyay*

**26/03/2022** Guddida Arrimaha Bulshada ayaa Safar shaqo ugu Baxday Gobolka Gabiley Safarkan ayaa daarna xog Uruurin iyo Xogogaal unoqosho Baahiyaha Aasaasiga ah sida Caafimaadka iyo waxbarshada  kulan oo ay Guddidu kulamo la yeelatay masuuliyiinta kala duwan ee Hay'addaha Dawlada sida Mayer-ka Gobolka Gabiley, Badhaasaab ku xigeenka Gobolka,Gudoomiyaha Caafimaadka, Isuduwayaasha kale duwan sida:- Hay'adda Shaqaalaha, wasaarada shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Warfaafinta iyo dhamaan Hay'addaha ay Guddida wada shaqeynta lee yihiin.



*Kulamadii Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Masuuliyiinta Gobolka Gabiley*

**27-03-2022** Guddida Arrimaha Bulshada ayaa Safar shaqo ugu baxday Gobolka Awdal ee Boarama Safar ayaa Ujeedkiisu ahaa in ay Guddida Arrimaha Bulshadu soo Indhodheyso xaaladaha Abaareed iyo Ujeedka weyn oo ahaa Baahiyahaha Aasaasiga ah ee Arrimo Bulsheed sida: Caafimaadka, Waxbarshada,Biyaha, Ciyaaraha iyo Dhamaan Hay'addaha kale ee wada shaqeynta la leh Guddi

Hoosadka Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiilada, Guddida ayaa Xogo Muhiim ah waxa la wadaagay Mayer ku xigeenka Borama, badhasaabka iyo Isuduwaayasha ay khusayso.



*Kulamadii Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Masuuliyiinta Gobolka Awdal*

**29-03-2022** Guddida Arrimaha ayaa Kormeer iyo Xog Uruurin ku tagay Gobolka Selal, Ujeedka Kulankan ayaa Daarnaa u kuur Galida Xaaladaha Abaareed iyo Arrimo Bulsheed ee Gobolka Awdal, sidoo kale Guddida ayaa Su'aalo dhinac walba Taabanaya ka weydiisay dhamaan Hay'addaha wada Shaqeynta leeyihiin sida:- Golaha Deegaanka,Barakacayaasha, Commission-ka AIDs ka, Hay;adda Shaqaalaha iyo Dhamaan Hay'addaha wada Shaqeynta la leh Guddida Arrimaha Bulshada, itaa kadib waxa Masuuliyiinta Hay'addaha dawlada ayaa ka xog waramay siday wax u jiraan kana Jawaabay Dhamaan Weydiimihii laga Weydiiyey Shaqooyinka ay Qaranka u Hayaan.

## Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Shaqooyinka iyo wax-qabadkii Gudidda Garsoorka, Cadaaladda, Dastuurka iyo Xuquuqal Insaanka mudadii Kal-fadhigii 2aad iyo intii ka dambeysay ay qabatay waxay kala ahaayeen sidan soo socota.

### *Kormeerka Xabsiga Burco iyo Xafiisyada Maamulka Gobolka*

**13/11/2021,** Gudiddu waxay kormeer shaqo oo qaatay dhawr maalmood ugu Baxeen Gobolka Togdheer, kormeerkaas oo ay ku soo mareen **Jeelka wayn ee Burco, Maxkamada Racfaanka ee Gobolka, Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka, Xarunta Dawlada Hoose ee Burco iyo Xarunta Mujaahidiinta Sooyaal Burco.** Gudidu intii ay ku guda jirtay kormeerkaas waxay ugu kuur galaysay Xaaladaha Maxaabiista ku jira Xabsiga, Arimaha nidaamka garsoorka iyo maxkamahada Gobolka, Xaaladaha xaquuqal Aadamaha ee Gobolka iyo Xaaladaha Ku gadaaman Mujaahidiinta Sooyaal Burco iyo baahiyahooda. Gabogabadii kormeerkaas gudida waxay ku soo ogaatay baahiyo badan oo ka jira gobolkaas.

### *Soo Gudbinta Xeerka ilaalinta Xaquuqda Caruurta*

**29/01/2022,** Gudid Garsoorka iyo Cadaaladu waxay Gole waynaha u soo gudbisay kana horjeedisay Warbixinta **Xeerka ilaalinta Xaquuqda Caruurta**, ksoo ay gudidu shaqadiisa gacanta ku haysay, iyagoo Wax kabadel iyo kaasbisna ku soo sameeyey ka dib markay kulamo la soo qaadateen Daneeyayashii xeerkaasi khuseeyay.




*Kulanka Gudoomiyaha Golaha oo Gudidda Garsoorka iyo Cadaaladu weheliso oo ay kula kulmay Gudidda Xuquuqal iyo Insaanka Qaranka*

### *Kulamadii aqoon-is-weydaarsiyada (workshops)*

**6/03/2022** Xubno kamida Gudida Garsoorka iyo Cadaalada ayaa ka qayb galay kulan hawleed (Workshop) loo qabtay Gudoomiyayaasha, Ku xigeenada Iyo xoghaymaha Gudiyada Golaha. tababarkan oo ka dhacay Hotelka Casood. Mudadii uu socday Kulan hawleedkaasi waxa diirada lagu saay kor uqaadista aqoonta Gudoonka Gudiyada iyo siday gudiyadu u shaqeeyaan, isla markaana u gudun lahaayeen wajibaadkooda Dastuuriga ee ay golo waynaha u qaabilsan yihiin.

### *Kulanka Komishanka Xuquuqal Aadanaha Qaranka*

**13/02/22 Gudida Garsoorka iyo Cadaaladu** waxay kulan la yeelatay Komishanka Xuquuqal Aadamaha qaranka, kulankaas oo ka dhacay xafiiska gudoomiyaha Golaha Wakiilada. **Mudane Cabdirisaaq Khaliif Axmed.** Kulankaas oo ku saabsanaa ku soo wareejinta warbixin sanadeedka xuquuqda Aadamaha Qaranka oo ay soo diyaariyeen komishanka Xuquuqda Aadamaha Qaranka, intii kulankasi socday Komishanku waxay ku Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Ku wareejiyeen Buugaagta warbixintu ku qoraynay, ka

dib gudoomiyaha Goluhuna waxa uu ku soo wareejiyay Gudida Garsoorka iyo Cadaalada ee Golaha si ay hawshooda uga gutaan.

### *Kulankii Gudidda iyo Gudoomiyaha Ha'yadda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha*

**16/04/22** Gudida Garsoorka iyo Cadaaladu waxay kulan la qaadatay Gudoomiyaha Ha'aydda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha JSl **Mudane Cabdikariim Axmed Maxamed (Xinif)** oo ay weheliyaan saraakiil kale oo ka tirsan ha'yadaa. Kulankaas oo ka dhacay Xafiiska Gudida wuxuu ku saabsanaa is barasho iyo xog-waysi ay gudigu warbixin la xidhiidha qabyo-qoraalka Xeerka Qaxoontiga iyo Magan-galyo-doonka Somaliland ka waraysanaysay, intii kulankaas lagu gudo jiray Gudoomiyuhu Gudida wuxuu siisay warbixin balaadhan oo dhinacyo badan taabanaysa iyo guud ahaan xaalada ay ku sugan yihiin Qaxoontiga iyo magan-galyo-doonka dalka Jooga.



*Kulan Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku la yeesheen Gud. Hay'adda Barakcayaasha*

## Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Shaqooyinka iyo wax-qabadkii Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsigu soo qabatay mudadii Kal-fadhigii 2aad iyo intii ka dambeysay waxay kala ahaayeen sidan soo socota.

- **17-18** December **2021,** Guddida dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay kulan howleed u qabatay Mashruuca Sharciga Shirkadaha Caymiska taas oo ujeedadu ahayd ururinta talooyinka iyo soojeedimaha daneeyayaasha mashruuca lana siiyay mudnaanta kowaad sidoo kale Guddidu fadhiyo badan yeelatay. Shirkadaha adeegyada caymiska bixiya ayaa muddooyinkii ugu danbeeyay kusoo badanayay dalka Jsl kuwaas oo u arkay in dalku ama bulshadu ay baahi wayn u qabto caymiska sida Caymiska Gaadiidka, Caymiska Caafimaadka iyo IWM.

  Sidoo kale loo arkay inuu leeyahay dabci dhaqaale kana qayb qaadanayo koboca dhaqaale ee dalka, sidoo kale kor u qaadayo helitaanka shirkado caymis oo tayo iyo hanaan loo raaco leh, iyaddoo maanka lagu hayo in xeerkii hay'ada caymiska Qaranka hore loo ansixiyay dhaqan galayna sidaa darteed Guddidu iyaddoo gudanaysa

waajibaadka uu xeer hosaadku tilmaamay waxay xil iska saartay sidii ay gole waynaha u hor keeni lahayd xeer koobsanaya loo maro hanaanka ay shirkadaha caymisku u bixinayaan adeegyada caymiska iyo sidii loo dhamaystiri lahaa mabaadii'da guud ee xeerka asaaska Hay'adda Caymiska Qaranka **Xr.Lr.93-2020**.



*Kulan Gudidda Dhaqaalaha iyo Wasiirka iyo Saraakhiisa Wasaarda Horumarinta Maaliyada*

- **Misaaniyadda Qaranka 2022-ka,** Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga markay la wareegtay Misaaniyadda Qaranka ee **2022-**ka **25-12-2021** waxay kulamo badan la yeelatay Wasiirka Maaliyadda iyo madaxda kale ee dowlada taas oo looga dan lahaa helido warbixino ku saabsan siyaasadda loo diyaariyay misaaniyadda, dakhliga soo xarooday **(Actual)**, dakhliga soo xaroondoona **(estimate) i**yo kharash galka dowlada**,** mashaariicda mudnaanaha ay siiyay dowladu, xaalada guud ee Dhaqaalaha dalka iyo Warbixinta habsami u socodka Misaaniyadda **2021**-ka iyo ku dhaqanka lifaaqa Go'aanada Golihii hore ee **2021,**

  **S**idoo kale Qorshaha Misaaniyadda **2022** ku jira iyadoo ay Guddidu ka duulaysa Xeerka Maamulka Maaliyadda **Xeer Lr.75-2016,** Xeer Hosaadka Golaha Wakiilada **Xr.lr.01-2021** iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka **(NDPII)** iyo (**National Vision 2030).** Guddidu iyagoo gudanaya qaar ka mida waajibaadkooda iyo awoodahooda waxay waxbixin dhamaytiran ka diyaariyeen Misaaniyadda **2022** iyagoo kusoo lifaaqay una soo gudbiyay Golewaynaha taariikhdu markay ahayd **15-01-2022.**

  **Xeerka Shirkadaha Caymiska:-** Gudidda Dhaqaaluhu Waxay ka soo shaqaysay Xeerka Shirkadaha Cayamista oo ay gacanta ku haysay Kal-fadhigii 2aad ee Golaha, iyadoo Gudiddu markii ay soo naaqishtay isla markaana kulamo kala duwan la soo yeelatay daneeyayaasha Xeerkaas ay ka soo diyaarisay Warbixin balaadhan oo xambaarsan wax

ka badal iyo kaabis ay Xeerka ku soo samaysay, waxayna Warbixintaas wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Shirkadaha Caymiska ay Golewaynaha u soo gudbisay **05 February 2022.**

- **Masuuliyiintii Qaran ee ay ka soo tala-bixisay**: - Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu iyadda oo maraysa hanaanka ansixinta masuuliyiinta dowlada Jsl sida u jideeyay Dastuurka iyo xeer hosaadka Golaha Wakiilada waxay ansixin heer guddi ku samaysay laba masuul kuwaas oo Madaxweynuhu soo magacaabay waxayna kala ahaayeen

    1. Md. Cali Cabdilahi Daahir Guddoomiyaha Baanka Dhexe.
    2. Marwo. Rooda Jaamac Cilmi Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyada

## Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka Shaqooyinka iyo wax-qabadkii ay soo qabatay mudadii Kal-fadhigii 2aad iyo intii ka dambeysay waxay kala ahaayeen sidan soo socota.

**April-6-2022**, waxa ay Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka ee Golaha Wakiilada kormeer ku tageen suuqa waaheen oo dab xoogani ka, kacay bishii April 1-2022 waxa ay u kuur-galeen khasaaraha dabkaasi sababay, kormeerkaas ka dib waxa ay guddidu in haddii suuqii waaheen inaga gubtay la badbaadiyo suuqyadda kale ee dalka ee inoo hadhay, si cashar ay inoogu noqoto masiibadii ka dhacday suuqa waaheen.





*Gudidda Hawlaha Guud oo Kormeer ku tagay Suuqa Waaheen ee dhowaan Masiibadu dabka ka dhacday*

**April-9-2022**, waxa ay Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka ee Golaha Wakiilada, kulan xog-wareysi ah la yeesheen Wasiirka Wasaaradda Hawlaha guud, dhulka & guryeynta JSL, Mudane Cabdilaahi Abokor Cismaan.




*Kulankiki Gudidda Hawlaha Guud iyo Wasiirka Wasaarda Hawlaha Guud kaas oo ka dhacay Xafiiska Gudidda ee Golaha*

**11 –April- 2022**, waxa ay guddida hawlaha guud, tiknoolajiyadda guryeynta & dhulka, ee Golaha Wakiilada kormeer ku tageen Taliska Ciidanka Dab-damiska JSL, halkaas waxa guddida ku soo dhaweeyey Taliyaha Ciidamada Dab-damiska Sarreeye Guuto Axmed Maxamed Xasan (Axmed Sawaaxili).




*Gudidda Hawlaha Guud ee Golaha oa Kormeeray Xarunta CIidanka Dab-damiska, kulana la yeeshay Taliyaha Dab-damiska*

## Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga

Guddida Arrimaha Dibedda Iskaashiga Caalamiga, Qorshaynta Qaranka iyo Maalgashiga iyaga oo gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo kan ku xusan qodabka 57aad ee Xeer- Hoosaadka Golaha waxay soo qabteen shaqooyinkan kala ah:-

### Kulankii Wasaaradda Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha.

Guddida Arrimaha Dibedda Iskaashiga Caalamiga, Qorshaynta Qaranka iyo Maalgashiga iyaga oo gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo kan ku xusan qodabka 57aad ee Xeer- Hoosaadka Golaha Wakiilada JSL.

- Tariikhdu markii ay ahayd **08/02/2022** waxay ay kulan booqasho iyo isbarasho iskugu jira ugu tageen xaruuntiisa Wasiirka Wasaaradda Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha. Si Guddidu ay u dhisto xidhiidh dhow oo ku qotoma

hanaanka wada shaqaynta ee Wasaaradda. Guddida waxaa ku qaabilay xafiskiisa Wasiirka Wasaaradda oo uu weheliyo Agasimaha Guud ee Wasaaraddu.




Kulan Arrimaha Dibada, Qorshaynta iyo Maal-gashiga oo Xafiiskiisa ku booqday Wasiirka W. Maalgashiga

## Ka tall-bixintii Ansixinta Masuuliyiinta uu Madaxwaynuhu soo Magacaabay.

Guddida Arrimaha Dibedda Iskaashiga Caalamiga, Qorshaynta Qaranka iyo Maalgashiga waxay **09/01/2022 iyo 11/01/2022.** Golewaynaha uga soo tallo-bixiyeen si uu ansixiyo saddex Masuul oo u Madaxwaynaha JSL uu soo magacaabay jagooyinka kala ah:

1. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah
2. Wasiir-ku-Xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah iyo
3. Wasiirka Wasaaradda Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha



*Kulamadii Gudidda Arrimaha Dibadu la yeelatay Wasiirka Arrimaha Dibada si ay uga soo tallo-bixiso Ansixintiisa*

## Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

- ***KULANKA GUDDIDA SHAREECADA IYO WASIIRKA DIINTA IYO AWQAAFTA.***

**30 November 2021** Gudida Arimaha Shareecada Dhaqanka iyo Qoyska oo uu hogaaminayo gudoomiyaha gudida mudane Axmed Dayib Aadan waxa ay kulan xog waraysi ah la qaateen wasiirka diinta iyo awqaafta Sheekh Cabdirisaaq Xuseen Cali (Albaani). Gudidu waxay su'aalo ka waydiisay wasiirka inuu xog buuxda ka siiyo wasaarada, qaab-dhismeedkeeda, sida ay u shaqayso, iyo waxyaabihii u qabsoomay intii uu xilka hayay.

Wuxuu sheegay wasiirku in wasaaradu, waa wasaarada diinta iyo awqaafta'e, xafiisyo hantiya ayna ku lahayn gobolada balse ay xafiisyadoodu kiro ku jiraan, sidoo kale wuxuu wasiir Sheekh Cabdirisaaq Xuseen Cali (Albaani) sheegay in shaqaalaha wasaaradu marka la isku wada daro dhamaan gobolada ay tiradoodu dhan tahay 222 shaqaale.

Intaas wuxuu ku daray wasiirku in dakhli ahaan wasaaradu aad u hoosayso. Wasaaradani mayna curin wax xeer ah oo hore balse hada waxay gacanta ku haysaa laba xeer oo kala ah: Xeerka awqaafta iyo xeerka diiwaanka sakada.

- ***KULANKA GUDDIDA SHAREECADA IYO QAAR KAMID AH CULUMADA IYO GUDIDA DHAQAALAHA.***

**30 November 2021** waxay gudida Arimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska kulan la qaateen qaar ka mid ah culumada iyo gudida dhaqaalaha iyo maaliyada. Kulankan oo ka dhacay library-ga ayaa ujeedadiisu ahayd in la iswaydiiyo shareecadu maxay ka qabtaa caymiska oo ah xeer horyaala golaha oo gudida maaliyada iyo dhaqaaluhu gacanta ku hayaan.

Culumada ay gudidu la kulantay ayaa waxa kamid ah Dr Cabdiqani Beder, Sheekh Cabdiraxmaan Aw-Axmed, Dr. Khadar Xasan Axmed, Dr. Ciise Maxmuud Cabdillaahi iyo Sh. Ibraahim Axmed Xirsi.

Waxaa ay culumadu talobixin guud oo ku saabsan xeerka caymiska u soo jeediyeen gudiyada kala ah gudida Arimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska iyo gudida Maaliyada iyo Dhaqaalaha, iyagoo Gudiddu Warbixintooda soo raacin doona Tala-bixintaas oo faah-faahsan.

- ***KULANKA GUDDIDA SHAREECADA IYO GUDDIDA WANAAG-FARISTA IYO XUMAAN-REEBISTA.***

**01, December, 2021** Guddida Arimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska waxa ay kulan la qaateen Guddida Wanaag-farista iyo Xumaan-reebista Somaliland. Guddidu waxay la kulmeen Guddoomiyaha Guud ee Guddida Sheekh Muuse Jaamac, Xoghayaha guud Sheekh Muxyadiin Xasan (Xikmaawi) iyo Guddoomiyaha Gobolka Maroodi-jeex Sheekh Ismaaciil Iid Cabdiraxmaan.

- ***KULANKA GUDDIDA SHAREECADA IYO WASIIRKA DIINTA IYO AWQAAFTA.***

**06, January, 2022.** Sida Qodobka 53aad ee dastuurka JSL uu qeexayo waxa waajib ah inuu ogolaansho Golaha Wakiilada ka helo qof kasta oo loo magacaabo wasiir, wasiir ku xigeen iyo madaxda hay'ada dawladda iyadoo la raacayo dastuurka. Sidaa darteed, waxaa Gudida Arimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska la kulmeen wasiirka Diinta iyo Awqaafta Somaliland Sheekh Cabdirisaaq xuseen Cali (Albaani), kulankani wuxuu ku saabsanaa inay Gudiddu hubiso in Masuulkaas Xilka uu Madaxweynuhu u magacaabay uu qalmo Golahana talla-bixin uga siiso.

- ***KULANKA GUDDIDA SHAREECADA IYO URURKA WACYIGALINTA IYO DABARGOYNTA MUKHAADARAADKA.***

**14, March, 2022** Gudida Arimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoysku wuxuu kulan la yeeshay ururka wacyigalinta iyo dabargoynta mukhaadaraadka. Kulankan oo ka dhacay xafiiska gudida Arimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska ayaa u jeedadiisu ahayd xog waraysi ku saabsan mukhaadaraadka oo bulshada dhibaato badan ku haya.

## Gudidda Arrimaha Nabadgalyada, Difaaca iyo Amniga

- **25/01/2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca, Amniga iyo Nabad-galyada ee Golaha Wakiilladu waxay kulan Xog-waraysi ah la yeelatay Gudoomiyaha Golaha Deegaanka Hargeisa Md. Cabdikariin Axmed Mooge, kulankaas oo duqa Caasimadu Guddida uga Xog waramay Shaqada ay qaranka u hayaan.



*Kulan Gudidda Arrimaha Gudaha ee Golaha Maayarka Caasimada Hargeysa ee ka dhacay Xafiiska Gudidda*

- **27/2/20222** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Taliyaha Ciidanka Socdaaalka kulankaas oo ay isku waydaarsadeen warbixino iyo is su`aalo ku saabsan ciidanka socdaalka.

- **01/03/2022**Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Ururada aan dowliga ahayn ee SONSOF kulankaas oo ahaa isbarasha iyo xog-waraysi.

- **29-03-2022**Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyada ee Golaha Wakiillada JSL ayaa safar shaqo oo Ujeedkiisu ahaa u kuur-galka xaaladaha Amniga iyo xog-Uruurin ku saabsan waxay ugu baxday Goboalka saaxil caasimadiisa Berbera. Intii ku jireen safarka shaqo waxay Gudiddu kulamo kala duwan la yeelatay isla markaana warbixino ka dhagaysatay masuuliyiinta kala ah: -
    - Badhasaabka Gobolka Saaxil
    - Maayarka Degmada Berbera iyo Maamulka Dawlada Hoose
    - Taliyaha Xigeenka qaybta Booliiska Gobolka Saaxil
    - Taliyaha Ciidanka Xeebaha ee Gobolka Saaxil
    - Taliyaha Sirdoonka ee Gobolka Saaxil




*Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Difaaca ee Golaha oo Kormeer ku jooga Gobolka Saaxil*

- **13/3/2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca, iyo Nabad-Galyada ee Golaha Wakiillada JSL ayaa Kormeer shaqo waxay ugu baxeen Gobalka Togdheer caasimadiisa Burco. Safarka kormeerkaas oo ku saabsanaa Arrimaha Nabad-galyada Gobolka iyo xog-Uruurin dhinac amniga ah, axayna kulamo la yeesheen Badhasaabka Gobolka iyo

Taliyayaasha Ciidamada kala duwan ee heer Gobol, sidoo kale intii kormeerka ku joogtay Gobolka Togdheer waxay la booqatay Xarunta Dawlada hoose iyadoo halkaas kulan kula yeelatay Maayarka Degmada Burco iyo maamulka kale dawlada hoose ee Degmadaas.



*Kulamo ay Gudidda Arrimaha Guduhu la yeelatay Madaxda Heer Gobol ee Gobolka Tog-dheer oo ay kormeer ku tageen*

- **16/4/2022** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Maayar ku-xigeenka Caasimada Hargeysa iyo Xoghaya fulinta D/hoose ee Hargeysa kulankaas oo ahaa kulal xog-wareysi ku saabsan masiibadii ka dhacday suuqa waaheen iyo halka ay wax marinayaa iyo sidoo kale Xeerkii caasimada.

- **03-2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyadu waxay Xafiiskeeda kulan kla yeelatay u qaabilsanaha UK ee Somaliland, kulankaas oo Ujeedkiisu ahayd sidi ay safaarda UK iyo Gudidu uga wada shaqayn lahaayeen horumarinta laamaha Amniga iyo sidii Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyada ee Golaha Wakiillada ay uga wada shaqayn lahaayeen shuruucda ku sabsan amniga iyo nabad galayda.

- **15/03/202** Gudida waxay Kormeer shaqo oo ku saabsan Arrrimaha Nabadgalyada iyo xog-waraysi iyo sidoo kale baahiyaha dawlada hoose ah ku tagtay Degmada Shiikh ee Gobolka Saaxil, halkaas oo Maayarka iyo qaar ka mid ah Xildhibaanada Gobolka Saaxil ay ku siiyeen Gudidda Warbixin ku saabsan Degmada Shiikh, baahiyaha ka jira iyo sidoo kale xaaladaha Abaaraha.


*Gudidda Arrimaha Guduhu Xafiiska kula yeelatay Maayarka Degmada Shiikh oo kormeer ku tageen*

## Gudiyadii Gaarka ahaa Kal-fadhigii 2aad la saaray

Intii lagu jiray Kal-fadhigii 2aad ee Golaha Wakiillada 5aad, wuxuu Gudoonka Goluhu magacaabay laba Gudi oo gaar ah (ad hoc committees), kuwaas oo kala ahaa: -

1. Gudi gaar ah oo loo saaray soo diyaarinta iyo dhamaystirka Qorshaha shanta sano ee Golaha Wakiillada (HoR 5-years strategic plan 2022-2026)
2. Gudi gaar ah oo loo saaray inay ka soo shaqayso Xeerka Shirkadaha Caymiska oo Goluhu u baahday in dib loo soo naaqisho.

## QORSHE ISTARAATIJIYADEEDKA 5TA SANNO EE GOLAHA WAKIILLADA

Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. C/risaaq Khaliif Axmed** isago ka duulaya Qodobka 3aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada wuxuu **13 December 2021** Gudi gaar ah (ad hoc committee) u magacaabay soo diyaarinta Qorshaha 5ta Sanno ee soo socota Golaha Wakiilladu ku shaqayn doono, ka dib markuu arkay ahmiyada ay leedahay in Goluhu helo qorshe Istaraatiijiyadeed uu ku hawl galo, isla markaana loo baahan yahay in la dhamaystiro qorshaha iyo istaraatiijiyada Golaha ee shanta sanno ee soo socda (2022-2026) Gudiddaas oo ka kooban 10 Mudane iyo laba Agaasime Waaxeed.

Hadaba, Gudidaas gaarka ahi, si u gudato hawlaha iyo waajibaadka loo xilsaaray waxay kulankoodii u horeeyay yeesheen 15 January 2022 waxay ku doorteen Gudoon, iyagoo Gudiddu Gudoomiye u doorатay **Md**. **Mukhtaar Xasan Maydhane**, halka Md. Maxamed Xasan Siciid u doorатay Gudoomiye ku-xigeen, isla markaana waxay isla qaadatay qaabka ay u shaqaynayso, iyadoo kulankii labaad Gudiddu ku lafa-gurtay sidoo ay dardargalin lahayd qorsheheeda shaaqo.




*Gudoomiyaha Golaha oo Kulan la yeeshay Gudidda Soo diyaarinta Qorshaha 5ta Sanno ee Goluhu ku shaqayn doono*

31 January 2022 Gudiddu waxay kulankeedii u horeeyay la yeelatay **Gudoomiyaha Golaha Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed**, ugu horeyn waxay Gudiddu Gudoomiyaha la wadaagtay qorsheheeda shaqo, waxyaabaha ay maamul ahaan uga baahan yihiin Shir-gudoonka iyo guud ahaan Golaha iyo mudda ay ku qaadanayso hawshu. Gudoomiye Khaliif wuxuu dhiniciisa Gudidda ku booriyay inay dedejiyaan isla markaana Golaha u soo saaraan qorshe istaraatiijiyadeed uu ku shaqeeyo shanta sanno ee soo socota.



*Gudoomiyaha Golaha iyo Gudoomiyaha Gudidda Diyaaarinta Qorshaha 5ta sanno ee Golaha Wakiillada*

Intaas ka dib, Gudiddu waxay Guda-gashay hawleheeda shaqa, waxayna ugu horeyn Gudiddu dalbatay La-taliyayaal khibarad u leh samaynta qorshayaasha Baarlamaanada, waxaynu Gudiddu heshay laba la-taliye oo ay Hay'adda IRI ka caawisay kuwaas oo Dalka dibadiisa laga soo qaatay, labadaas la-taliye oo kala ahaa Brown Makosi iyo Ahmed Issak oo labaduba u dhashay Dalka Kenya, waxayna Gudidda ka caawiyeen soo diyaarinta qabyo-qoraalka Qorshaha shanta sanno, iyagoo muddo bil (February 2022) ah gudidda la shaqaynayay.

Gudidda oo ay weheliyaan La-taliyaasha iyo xoghaynta Goluhu waxay yeesheen kulamo is-daba joog ahaa oo lagu lafa-gurayay, laguna falanqaynayay qorshahaas waxyaabaha uu ka koobnaanayo, qaabka uu yeelanay iyo cutubyada uu ka koobnaanayo.

Gudiddu waxay labada la-taliye kala wareegtay nuqulka kowaad ee qabyo-qoraalka 27 February kulan uu goob joog ahaa **Gudoomiye ku-xigeenka $2^{aad}$ Md. Cali Xaamud Jibriil**, kulankaas oo lagu soo bandhigay nuqulka qabyada ah ee qorshaha shanta sanno, iyo waxyaabaha ka dhiman sidii loo dhamaystiri lahaa, taas oo ay ugu horeyso ka qayb-galinta iyo kala tashiga qaybaha ay khusayso (stakeholder's consultation meetings), waxayna Gudidda iyo Gudoomiye ku-xigeenka 2aad u mahadnaqeen labada khabiir ee la-talinayay Gudidda.



*Gudidda Soo diyaarinta Qorshaha 5ta Sanno iyo Khubaradii iyo La-taliyayaashii kala shaqaynayay kala wareeqay nuqulka 1aad*

Intaas Gudiddu waxay gudo-gashay kulamo dhowr ah oo ay la yeelatay qaybaha kala duwan ee khuseeyo Qorshaha shanta sanno sida hay'addaha dawlada ee si toos ah Golaha ula shaqeeya, Gudiyada Golaha, Agaasaime Waaxeedyada iyo La-taliyayaasha Golaha, hay'addaha Caalamiga ah ee Golaha la shaqeeya, Ururada Bulshada, Saxaafada iyo Haweenka, si ay tallooyinkooda iyo aragtidooda u hesho, kulamadaas oo qabsoomay intii u dhaxaysay **14 March ilaa 25 March** kulamadaas oo dhamaantooda si hufan u qabsoomay waxay gudiddu ka ururisay soo jeediyo iyo fikrado wax ku ool ah kuwaas oo qabyo-qoraalka ay ku soo dartay wixii u aragtay muhiim.



*Kulamadii Gudidda Qorshaha 5ta Sanno u qabatay qaybaha kala duwan (Stakeholers consultations meetings)*

Kadib markii ay kulamadaas ka soo ururisay Guddidu xog baaxad leh, waxa ay bilowday inay is waafajiso qorshaha iyo falcelintii daneeyayaasha Golaha, kuwaasoo saamaynayey hawlaha iyo ujeedooyinkaa istaraatajiyadeed iyo qaabka loo fulinayaba. Ugu dambeyn, Gudidda Gaar ah ee Qorshaha shanta sanno loo saaray waxay soo diyaarisay oo ay gacanta ku haysaa nuqul hufan oo wax ku ool ah, kaas ay kala-fadhigan Shir-gudoonka iyo guud ahaan Golaha la wadaagi doonto.

## AQOON-KORODHSIYADII LOO QABTAY GUDIYADA GOLAHA

**March 5-7, 2022,** Waxa Assod Hotel ee loogu qabtay tababar ku saabsan kor u qaadista aqoonta Gudoonka Guddiyada kala duwan Golaha Wakiillada tababarkan oo soconayay mudo laba cisho ah ayaa lagu qaatay sida ay Guddiyadu u shaqeeyaan, isla markaana u gutaan waajibaadkooda shaqo ee ay Golaha u qaabilsan yihiin.




*Xubnaha Gudiyada Golaha oo ku jiraa kulan aqoon korodhsi ku saabsan sida Gudiyadu u shaqeeyaan*

Kulankaas oo uu furay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiillada Md. Cali Xaamud Jibriil, wuxuu ku booriyay in Xildhibaanadu ay ka faa'iidaystaan tababarka isla markaana ku dabakhaan hawl maalmeedka ay Guddiyadu qabtaan, isagoo u mahadceliyay hawl-wadeenada Golaha ee soo qaban qaabiyay tababarkan iyo xarunta (Center for SDGs) oo farsamo ahaan Golaha ugala shaqaysay qabashada tababarkan iyo Hay'adda Caalamiga ah ee IRI oo maalgaliyay qabashada tababarkan.

Intii uu socday tababarkaasi waxay Mudanayaasha Gudiyadaa iyo hawl-wadeenadoodu ku qaateen aqoon fiican oo ku dabaqi doonaan shaqadooda, sidoo kale waxa la isku waydaarsaday aragtiyo iyo aqoon dheeraad ah, waxa tababarkaas bixinayay khubaro aqoon badan u leh mawduucyada kala duwan ee lagu siinayay.




*Xoghaymaha Gudiyada u shaqeeya oo la siiyay aqoon iyo tababar ku saabsan shaqada Gudiyada iyo siday ula shaqeeyaan*

Dhinaca Kale waxa **21 March** tababar socday mudo laba cisho loogu qabtay Xoghaymaha Gudiydda, tababarkaas ooh awl-wadeenada Gudiyada lagu siiyay aqoon dheeraada oo khuseysa shaqada ay Gudiyada u qabtaan, siday u qaban lahaayeen, waajibaadka shaqo ee saran iyo hab-raaca shaqo gudasho, waxaan Tababarkaas Golaha ka caawiyay Hay'adda Adam Smith oo ka mid ah hay'addaha Golaha la shaqeeya.

# DOORKII GOLAHA WAKIILLADA EE ABAARIHII DALKA

Golaha Wakiiladu wuxu **6 February 2022** ka dooday Xaalada Abaaraha dalka, dooddaas ka dib, waxa Goluhu ka soo saaray qaaraar dhowr qodob ah ka dib markii Gudidda Hawlaha Golaha oo loo gudbiyay wixii doodda laga soo ururiyay ay naaqisheen si ay go'aan uga soo saaraan, waxayna gudiddu ka soo saartay dooddii dhowr qodob oo Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Md. C/risaaq Khaliif Axmed Golaha ka hor akhriyay.



***Shir-gudoonka oo Madaxweynaha ku-xigeenka ku wareejinaya $50 kun oo dollar oo Goluhu kaga qayb-qaatay gurmada abaaraha***

Wuxuuna Goluhu Go'aan qaylo dhaan ah ka soo saaray Xaalada ba'an ee Abaaraha ee dalka ka jiray, waxa qodobada doodda ka soo baxay ku jiray in Goluhu taakulada dadka abaaruhu saameeyeen kaga qayb-qaato lacag qadarkeedu **$50,000 (konton kun oo dolar),** taas oo Shir-gudoonka Golaha oo Gudoomiyuhu hogaaminayo ay isla maalintii xigtay iyadoo kaash ah $50,000 ugu wareejiyeen Gudidda Abaaraha Qaranka oo Madaxweyne ku-xigeenku Gudoomiye u yahay.

Sidoo kale waxa Goluhu Baaq Gurmasho ah u diray Dawlada Dhexe, Hay'addaha Caalamiga ah iyo kuwa Wadaniga ah, Ganacsatada, Dawladaha qaadhaan bixiyayaasha ah iyo Qurbo jooga reer Somaliland inay si deg deg ah ugu gurmadaan Dadka abaaruhu saameryeen kana qayb noqdaan dedaalada dadka iyo duunyadaba loogu gurmanayo.

# MAALINTA GOLAHA IYO DADWEYNAHA OO ARDAYDA JAAMACADA LA KULMAY.

December 22 2021 wuxuu Goluhu sameeyay maalinta Dadweynaha u furan, maalintaas oo Goluhu xaruntiisa kula kulmay koox ka mid ah Ardayda Jaamacadaha dalka, waxaana loo qabtay kulan dadweyne ujeedadiisu ahayd aqoon korodhsi ardayda lagu siinayay Siduu u shaqeeyo Golaha Wakiiiladu, Maamulkiisa iyo guud ahaan xidhiidhka bulshada gaar ahaan ardayda Jaamacadaha iyo Baarlamaanku leeyahay.




*Ardayda Jaamacadaha dalka oo kulan furan iyo tababar ku saabsan shaqada Golaha lagu siiyay Xarunta Golaha*

Kulankan waxa ardayda jaamacadaha loogu sharaxay shaqada Baarlamaanka waxaanay ardaydu su'aalo kala duwan oo maskaxdooda ka guuxaysay ku waydiiyeen Mudanayaashii ka soo qayb-galay iyo maamulka Golaha, ugu horeyn kulankaas waxa furay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Md. Cali Xaamud Jibriil, wuxuuna ardayda iyo bulshada kale ee ka soo qayb-gashay uu balan qaaday inay Gole ahaan kulamada noocan ah ay badin doonaan.

Xoghayaha Guud ee Golaha Mudane Cabdirisaaq Siciid Ayaanle, Agaasimaha Waaxda Shuruucda iyo Hadal-qoraalka Cawad Cali Maxamed iyo La-taliyaha siyaasadaha ee golaha Md Mubaarik Faarax Warsame ayaa iyaguna casharo kala

duwan oo ku saabsan shaqada iyo habraacyadiisa maamul iyo sida gudiyadu u shaqeeyaan sharaxaado dheeraada ka siiyey.

Sidoo kale waxa iyaguna Panelka u fadhiyay oo sharaxaado dheeriya siiyey markii danbena su'aalihii ardaydu waydiisay uga jawaabayayey xildhibaanada kala ah: -

1. Md. Mustafe Axmed Cabdilaahi Khayreeye
2. Md. Axmed Nuur Guruuje
3. Md. Axmed Xasan Cali Casoowe
4. Md. Maxamed Xasan Siciid
5. Md. Siciid Maxamed Ismaaciil (Sokeeye)




*SAWRIO. Maalinta Dadweynaha ee Golaha Wakiillada oo ardayda Jaamacada Dalka lagu qaabilay*

Waxa sidoo kale kulankan dadweyne ee ardayda ka soo qayb galay Xildhibaan ka tirsan Baarlamaanka dalka FINLAND oo la yidhaahdo KIMMO iyo Safiirka Somaliland u fadhiya Dalkaas Finland, wuxuuna Xildhibaanka Finladiska ah oo hadal kooban laga siiyay uu xusay in dimuqraadiyada somaliland uu aad ugu hambalyeynayo iyo sida ay Baarlmaankii la soo doortay bulshadii soo dooratay usoo horfadhiisteen ee ugaga jawaabayaan qadiyadaha ay qabaan ee faahfaahinta uga baahan yihiin.

## SAFARADII DALKA DIBADDIISA

### ➢ Wafti uu Hogaaminay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad oo safar ugu baxay Dalka Belgium.

**17 March 2022 Wafti** uu Hogaaminayay Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada **Md. Cali Xaamud Jibriil** aya Kulamo midho dhal leh oo ilaa kula yeeshay Xildhibaanada Baarlamaamka Midawga Yuru (Parliament European Union) ee xaruntoodu tahay Brussels, Belgium, kulankaas oo hordhac u ahaa kulamo kala duwan Xildhibaanada Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad hogaaminayo ay la yeesheen Xubnaha Baarlamaanka Midwaga Yurub, Masuulyiin kala duwan iyo hay'addo caalami ah.




*Gudoomiye ku-xigeenka 2aad oo Safar ku jooga Dalka Belgium kulamo kala duwan dalkaas kula yeeshay Madxda EU-da*

### ➢ Gudoomiye ku-xigeenka Gudida Joogtada ah oo ka qayb galay Shir Caalamiya oo Tunis ka dhacay.

Gufoomiye kuxigeenka Gudida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Wakiilada **Md. Axmed Xasan Cali (Casoowe**) ayaa ka qayb galay shir Caalamiya oo ka dhacay Magaalada Tunis ee Dalka Tunisia 30th 31st March 2022.

Shirka oo ay ka soo qayb galeen xildhibaano ka socday baarlamaanada Wadamada Carabta oo ay Somaliland ku jirto ayaa lagaga hadlay doorka Baarlamaanada ee horumarinta

caafimaadka qoyska (hooyada iyo dhalaanka), sidii miisaaniyad ku habboon loogu qoondayn lahaa iyo sidii baarlamaanadu ugu kormeeri lahaayeen hay'adaha dowliga iyo kuwa aan dowliga ahayn ee gacanta ku haya arrimaha khuseeya caafimaadka hooyada iyo dhalaanka. Shirka waxaa kaloo ka soo qayb galay Forum of Arab Parlimantarians on Population and Development iyo hay'ado caalami ah oo ay ka mid yihiin International Planned Parenthood Federation (IPPF) qaybta dunida Carabta iyo UNFPA. Shirkaas oo uu Xildhibaanku ku matalayay Somaliland. Waa markii ugu horraysey ee ay Soomaaliland si rasmi ah uga qayb gasho shirarka Baarlamaanada Wadamada Carabta ah.



*TUUNIS. Md. Axmed Cabdi Casoowe Gud. Ku-xigeenka Gudidda Joogtada oo ka qayb-galay Shirka Baarlamaanada Carabta*

Arrintan ayaa sii xoojinaysa Meeqaamka iyo doorka siyaasadeed ee Jamhuuriyada somaliland ka ciyaarayso fagaarayaasha Caalamiga ah, kana mid tahay xidhiidhada aadka isu soo taraya ee somaliland la yeelanayso dalalka Afrika, Carabta iyo guud ahaan dunidoo dhan

# WUFUUDIHII IYO MADAXDII KALE EE SHIR-GUDOONKU LA KULAMAY

## ➢ Wafti EU-da & UK ka socda oo Kulan la yeeshay Shirgudoonka

Wafti ka socdey wakiilada midowga Yurub iyo UK ayaa booqasho kooban ku yimi Golaha Wakiilada **25 Jan 2022,** waxayna la kulmeen Shirgudoonka Golaha iyo Xubnaha Guddida Arrimaha Dibada.

Kulankan oo si qiime leh u dhacay, waxaa Gudoomiye **Md. Cabdirisaaq Khaliif Ahmed** oo kulanka furay horeyn wuxuu si diiran ugu soo dhaweeyey waftiga wakiilada Midowyga Yurub iyo UK, isagoo Gudoomiyuhu xusey in taageeradooda ay Somaliland siiyaan gaar ahaan Golaha Wakiladaba ay ku mahadsanyihiin guud ahaan.

Intii lagu jiray kulankas Mr. Xasan Xiis oo ah la- taliyaha Arrimaha Dibada ayaa presentation Kooban la wadaagey xubnaha ka socdey midowga Yurub iyo UK, presentation oo ahaa soo koobid guud ahaan baahiyaha Golaha iyo Meelaha uu Strategy-ga qabyada ah ee Goluhu diirada saarayo in la hagaajiyo. Iyagoo dhinacooda xubnaha ka socdey midowga Yurub iyo UK, ay Shir-gudoonka waydiiyeen su'ku saabsan meelaha mudan in ay wax ka qabanayaan mustaqbalka dhaw. Waxaa sidoo kale ay ka wada hadleen doorka Golaha Wakiilada ee ku saabsan dhamaystirka xeerarka muhiimka u ah nabada, dimuquraadiyada, Doorashooyinka iyo arrimaha bulshada.

Kulanka wuxuu ku soo dhamaadey, jawi degan oo is-afgarad. Waana markii ugu horey ee ay wafti intan miisaankiisu leegayahay Golaha Wakilada booqasho shaqo ku yimaadaan, tan iyo markii Golaha Wakiilada 5aad la soo doortay, iyadoo Xubnaha Waftigaas kala ahaayeen xubno ka kala socday Dalal kala duwan, kuwaas oo kala ahaa.

1. Maria Groeneveld (EU)
2. Adnan Ahmed (EU)
3. Johan Svensson (Sweden)
4. Wacheke Michuki (Sweden)
5. Essi Raitala (Finland)
6. Nita Syvaoja (Finland)
7. Sascha Kienzle (Germany
8. Erling Johnsen (Norway)
9. Haako Svane (Norway)
10. Morgan Riley (UK)
11. Lizzie Walker (UK)
12. Mathias Kjaer (DK)

## ➢ Kulankii Shirgudoonka Golaha iyo Safiirka Dalka Sweden

**05 April 2022** Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed iyo Gudoomiye kuxigeenka 1aad Golaha Md. Siciid Mire Faarax (Giire) oo ay weheliyaan Xoghayaha Guud Cabdirisaaq Siciid iyo Lataliyaha shirgudoonka iyo Agaasimaha Qorshaynta ayaa kulan la qaatay Safiirka Dalka SWEDEN **Per Lindgarde** oo uu weheliyo madaxa siyaasada Safaarada **Mr. Yahan Svensson.**




*Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenka Iaad oo Xafiiska Gudoomiyaha kula kulmay Safiirka Dalka Sweden*

Safiirka oo ka mid ahaa Wufuud tiro badan oo dalka ku yimi safar ay ujeedadoodiisu tahay sidii ay indhaha u soo saari lahaayeen Masiibadii baaxada lahayd ee soo gaadhay Suuqa ugu weyn dalka ee WAAHEEN.

Safiirka iyo shirgudoonka ayaa xaalada suuqa waaheen ka sokow waxay ka wada hadleen Xaalada abaaraha ee dalka ka taagnayd iyo halka wax marayaan, sidoo kale waxay isla eegeen Xaalada dimuqraadiyada iyo doorashooyinka inagu soo fool leh.

Kulanka oo ay wakhti wada qaateen labada dhinac waxay ku kala qaateen xogo kala duwan, iyagoo isla meel dhigay talaabooyin ay tahay in hore loo sii qaado si wax looga qabto baahiyaha abaareed ee taagnaa, ka qayb qaadashada gurmadka Suuqa Waaheen iyo kor u qaadista Dimuqraadiyada dalka

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JLS**

*LIISKA TIXRAACYADA.*

### B) Ajandaha Kal-fadhigii 2aad

**Ajandaha Kal-fadhiga 2aad ee Golaha Wakiilada.**

**04/12/2021**

1. Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiillada
2. Warbixinta Guddida Joogtada iyo Gudiyadda kale ee Golaha Wakiillada.
3. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

| No. | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo | Cidda Gacanta ku haysa |
|---|---|---|---|
| **B.** | Qabyo-Qoraalka Xeerka Shirkadaha Caymiska | Akhriska 1aad | Guddida Dhaqaalaha |
| **T.** | Xeerka Illaalinta Xaquuqda Caruurta | Akhriska 1aad | Guddida Shuruucda |
| **J.** | Miisaaniyada Qaranka 2022 | Wasiirka Maaliyada | Wasiirka Maaliyada |
| **X.** | Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo Saaristiisa | Guurtida ka soo noqoday | Golewaynaha |
| **Kh.** | Xisaab-xidhka 2020 | Akhriska 1aad | Gudida Dabo-galka |
| **D.** | Xeerka ka-hotaga iyo xakamaynta, ka Ganacisga iyo Tahriibka Dadka | Akhriska 1aad | Golewaynaha |
| **R.** | Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada **Xeer. Lr. 14** | Ka soo noqoday madaxweynaha | Golewaynaha |
| **S.** | Xeerka Macdanta Qaranka | Akhriska 1aad | Guddida Khayraadka |
| **Sh.** | Wax-kabedelka Xeerka Maaraynta Maaliyada Dawladda - Xeer.Lr. 75/2021 | W.H.Maaliyada | Gudidda Dhaqaalaha |
| **Dh.** | Wax-kabedelka Xeerka Dakhliga Cashuuraha Beriga **Xeer.Lr.72/2016** | W.H. Maaliyada | Xafiiska Gudoomiyaha |
| **C.** | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Akhriska 1aad | Guddida khayraadka |

4. Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqda
5. Iyo Wixii kale ee soo kordha

**Shir-gudoonka Golaha Wakiilada JSL**

**Shir-gudoonka Golaha Wakiillada JSL**